



# Waxyaabaha Keena Caafimaad darada







# Waxyaabaha Keena Caafimaad darada

Leveled

Grade 2

Week 14





Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2008 T.I.



The CC By license lets others distribute, *adjust*, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Waxyaabaha keena  
caafimaad darada way  
badan yihiin waxaana ka  
mida.



Gacmaha oon lagu  
maydhin saabuun suuliga  
kadib.



Gacmaha oon lagu  
maydhin saabuun cuntada  
ka hor iyo kadib.



Cuntada oo lagu cuno  
weel aan nadiif ahayn.





Qashinka oon la  
uruurinin laguna daadiyo  
meel walba.




Qashinka oo lagu gubo  
meelaha bulshadu ku  
badan tahay.



Dharka aan xidhanno  
oo aan lagu dadaalin  
nadaafadooda.



Biyo aan nadiif ahayn  
oo la cabo ama lagu  
maydho.



Iyadoo lagu saxaroodo  
meelaha biyo qabatinka  
ah.



Shakhsiga oo aan ku  
dadaalin nadaafada  
jidhkiisa.



Sidaa darteed waa inaan ku dadaalnaa nadaafada guud iyo mida gaar ahaaneed.





